

# DUGSIGA SARE

## LEXINGTON

### DHAMBAAKA BISHA SEBTEEMBAR

AUDREY DOWNEY: PRINCIPAL/ CYNTHIA BAUM & LUIS NIETO: ASSISTANT PRINCIPALS/ PHIL TRUAX: ACTIVITIES DIRECTOR

#### MEERINTA CASHIRADA

Caawimaada cashirada iskuulka kadib waa isniin ilaa khamiis laga bilaabo 3:30 ilaa 4:30 galabnimo goobtuna waa qalka bulshada. Fadlan ku dhiiragali ilmahaaga inay ka faa'iideystaan caawimaada. Maclimiinta waxaa la heli karaa maalin kasta hadii caawimaad looga baahdo.

#### BALAMAHA

Haddii ilmahaagu ka tagayo dugsiga balan uu leeyahay awgeed maalintaas oo dhan fadlan warqad inoogu soo dhiib subaxaas, haddii kale, waalidku waa inuu soo galaa dugsiga uuna u saxiixaa warqad. Tani waxay u saamaxaysaa ardayga inuu ka helo xafiiska kaarka ogollaanshaha bixitaanka si ardayga halkaasi looga qaado waxayna yareyneysaa carqalada wicitaanka xafiiska ee fasalka.

#### MACLUUMAABADKA BOOSTADA

Maadaama aan bilaabayno sanad dugsiyeed cusub, fadlan iska hubi inaad dugsiga ku wargeliso macluumaadka cusub ee boostada . Inta lagu jiro sannad dugsiyeedka dugsiyada waxay boostada kuugu soo diri doonaan macluumaad waxaan doonaynaa inaan hubinno in aad heshid. Haddii aad guurtay ama qaadatay lambar cusub fadlan dugsiga ku wargeli.

#### WAQTI HORE IMAW

Ardaydu waa inay ku fadhiyaan kuraastooda iyagoo diyaar u ah inay wax bartaan ugu dambayn 8:00 subaxnimo maalin kasta. Haddii ilmahaagu mas'uul ka yahay inuu arday kale iskuul kale geeyo fadlan ku dhiiri gali inay horey u baxaan kuna imaadaan dugsiga wakhtigii loogu talagalay.

Haddii ardaygu ka soo dib dhaco 8:10 subaxnimo waxaa ardaygaas loo galinayaa HABSAAN 1 saac fasalkana looma ogolaanayo ilaa 1 kaas saac toos uga dhamaanayo.

#### ISKUUL MA JIRO

**Dugsiyada shacabka Lexington waa fasax maalinta isniinta 6-da bisha sebteembar iyo maalinta tallaadada 7-da bisha sebteembar .**

#### XIIRKA IMAANSHAHA OO LA CUSBOONEYSIIYAY

Dugsiyada Dadweynaha Lexington ayaa cusboonaysiiyay nidaamka imaanshaha. Nidaamka waxaa lagu daray dhambaal kaan. Fadlan hubi inaad dib u eegto isbedeladan.

Hoos waxaa ku qoran tilmaamo yar oo ku saabsan nidaamka

- Arday kasta oo ka maqnaada fasal kasta in ka badan 10 jeer oo aan cudurdaar lahayn fasalkaas waa laga saarayaa waxaana loo galinayaa rikoodhka F.
- Ardaydu waa inaysan maqnaashoodu ka badan 20 jeer sanad dugsiyadeedka si aan loogu gud-bin qareenka maxkamada u qaabilsan xad gudubyada maqnaashaha.
- Ardayda maqnaata 10 maalmood oo isku xigta ama ka badan waxaa laga saarayaa diiwaangalinta degmada.

#### QIIMAYNTA/BUUNDOOYINKA

Fadlan kala sheekeyso ilmahaaga arinta ku saabsan buundooyinkooda. Dugsiga Sare Lexington wuxuu leeyahay buundooyin loogu talagalay in lagu qalin jabiyo. Waxaa muhiim ah in ilmahaahga uusan keenin buundooyin hoose.

District Website-<https://www.lexschools.org/>

Activities Page-<https://www.lexschools.org/activities/>

LHS Facebook Page-<https://www.facebook.com/lexingtonHS>

LHS Phone- (308)324-4691 Hours: 7:30-4:00